



METRO  
NASHVILLE  
PUBLIC  
SCHOOLS

Horaanta sanad dugsiyeedka 2018-19, MNPS waxay bixin doonaan Taakulada Lacagta Prekindergartenka. Taakulada lacagta waxaa laga helaa in laga dhimo lacagta qoysaska xaq u leh ee aqbala booska ku salaysan lacagta la bixiyo. Qoysaska waqtigan dhibaato la soo deristey, qoyska xaalad degdeg ah ama masiibo ku dhacdo ee buuxiya shuruuda hoose xaq ayey u yeelan doonaan inay u soo gudbiyaan Arjiga Taakulada Lacagta Pre-K iyagoo ku soo lifaaqaya caddaynta iskuulka aqbalaya ilmahooda. Arjiyada ay la socdaan caddaynta waxaa dib u eegi doona si ay tixgelin u siiyaan hoggaanka Pre-Kindergartenka.

Shuruuda soo socota waa la tixgelin doonaa:

- **Dhibaato ama Xaalad Degdeg ku ah Qoyska** – Qoysku wuxuu la tacaalayaa duruufo aan caadi ahayn oo waqtigan saamaynaya dakhliga waalidka ama masuulka sharicga ah sida, inkastoo aysan intan ku koobnayn:
  - Daryeel xubno kale oo ka mid ah qoyska (tus., waalid da'a, caruur, qof qoyska ka mid ah oo naafa ah)
  - Shaqo la'aan; isbedel ba'an oo dakhliga ah ama kharashaadka
  - Naafanimo waqti kooban ama waqti dheer
  - Xaalad caafimaad oo aan la filayn ama xaalad degdeg ah oo la xiriirta caafimaadka
  - Waqtigan inay haysato dhibaato dhaqaale ama khasaare loo jeedo
  - Hal ilmo ama ka badan ku jira xannaanada caruurta lacagta la bixiyo
- **Dhibaato** – Qoysku wuxuu la tacaalayaa arin dhibaato weyn oo waqtigan saamaynaya dakhliga ama kharashka waalidka ama masuulka sharicga ah sida, inkastoo aysan intan ku koobnayn:
  - Geeri ku timaada mid ama ka badan waalidka, masuulka, ama qof muhiima oo qoyska ka mid ah taasoo isbedel ku keenta faa'iidada dakhliga ama kharashaadka soo gala qoyska
  - Jiro aan la filayn oo saamaynaysa shaqada, faa'iidada ama kharashaadka
  - Furiin ama kala maqnaansho saamaynaysa dakhliga qoyska kadib markay doorteen barnaamijka Pre-K
  - Khasaare ama waxyeelo ka dhashay dab ama masiibo dabiici ah oo guriga haleeshay
- **Isbedel Dhinaca Dakhliga** – Isbedel dakhli oo dhaca intii arjiga la soo gudbiyey iyo sanad dugsiyeedkan.

Dokumentiga caddaynta waxaa ka mid noqon kara inkastoo aysan ku koobnayn nuqulka jeega aad qaadatid, W-2, cashuur celinta, caddayn maxkamadeed ama sharci, qoraal dhakhtar, caddaynta shirkada loo shaqeeyo ama diiwaan la soo daabacay.